

Go'aanada Dood-wadaagi ku saabsanaa Dhalinyarada Soomaaliyeed

15/5/2013 Mogadishu

Kaalinta dhalinyaradu ku leedahay nabad-dhisidda iyo dib-u-dhiska dalka ayaa looga dooday laba heer ee munaasabad dood-wadaag si wanaagsan ay u fududeeyeen laba ka mid ah ururada bulshada ee kala ah IIDA iyo CRD. Ka qayb-qalayaasha Soomaalida ee dooda waxay ka kala socdeen ururada dhalinyarada, qaybta gaar-ahaaneed, NGOyada, Deladaha ururada, Rugta Ganacsiga & Warshadaha waxayna soo ban-dhigeen falanqayn heer sare ah ee arrimaha saameynayaa dhaliyarada iyo kaalintooda ku aadan nabad-dhisidda iyo dib-u-dhiska Soomaaliya. Ka qayb-galayaasha waxay ku nuux-nuuxsadeen xiriirka ka dhexeeya shaqa la'aanta iyo nabadgelya la'aanta iyo horumarinta xirfadaha dhaqaale iyo shaqo abuurista. Awooda dhalinyaradda u leeyihiin keenidda iyo balaarinta nabadda nugul iyo baahida loo qabo qaab dhammaystiran ee lagu jihataynaayo dhaliyarada ayaa sidoo kale laga dooday. Ka dib soo bandhigiyadii dood-wadaaga, shirka guud waxaa u suurta gashay inuu wax iska weydiyo qeexidda erayga dhilinyaro marki loo fiiriyo xaalada Soomaaliya iyo fursada maalgelineed ee suurta-galka ah ee jira.

Tallooyinka ugu waaweyn ee ka soo baxay wadahaladki dood-wadaaga waxaa ka mid ah:

- Dhalinyarada Soomaaliyeed waa in laga qayb-geliyaa shirarka nabadda meel kastoo ay ka dhacayaan. Waaya-argnimadu waxay tusaysaa in dhalinyaradda Soomaaliyeed ay u leeyihiin awoodo aan wax la bar-bar dhiga lahayn xagga xalinta khilaafaadka.
- In la balaariyo tababaridda xirfadeed iyo fursadaha shaqo ee dhalinyarada Soomaaliyyed gaar ahaan dhalinyarada haweenka ah. In la sameeyaa sahanno la xiriira suuqa shaqo si loo habsadaa banaamijayada xirfadeed ee suuqa leh.
- In la baadi-goobaa iskaashi u dhexeeya dowlada iyo qaybta gaar ahaaneed ee diirada saaraya horumarinta fursadaha xirfadaha dhaqaale iyo mashaariic amaah si dhallinyaradda u bilaabaan gacansiyo.
- In Rugta Ganacsiga & Warshadaha fududeysaa shirar maalgemin lagu qabto Soomaaliya isuna keenaya Soomaaliya iyo dowladaha xubnaha ka ah Midowga Yurub.
- In la sameeyaa sanduuq mashruuc dhilinyaro ay ku deeqayaan deeq-bixiyayaasha, ganacsatada iyo qaybta gaar ahaaneed, iyo
- In NGOyada iyo UN shaqooyinka dalka gudahiisa u qoondeeyaan dhalinyarada aqoonyahannada Soomaaliyeed kuwaasoo inta badan lagu reebo waayo-aragnimo la'aan.